## Sharciga Tallaalka Dugsiyada ee Minnesota

# Carruurtaadu Diyaar ma u Tahay Dugsiga?

**Tilmaameyaal:**

- Ogow da'da ilmaha/heerka waxbarasho adigoo **u akhrinaya** dhanka midig.
- Eeg in ilmuhu soo qaatay dhamaan tallaalada hoos ku taxan ee la calaamadiyey?

Fiiro- Gaar: Saf walba waa in si gooni ah loo akhriyaa, ha isku darin tirooyinka taxan ee ku hoos qoran tallaal walba.

**Tusaalle:** Ilmo waliba oo aan da' dugsi gaarin wuxuu u baahanyahay tallaal oo 4 DTaP ah, ka bacdi markuu dugsiga isku diyaarinayana wuxuu u baahanyahay 1 kale oo tallaal DTaP ah, isku-dar waa 5 (ma' aha 9).

| | **DTP/Td**<br>diphteria, teetano, xiiq (xiiq-dheer) | **Polio**<br>dabayl | **MMR**<br>jadeeco, qaamow-qashiir, jadeeco Jarmal | **Hib**<br>*Feyruuska* ifilo-weysada nooca B | **Hepatitis B**<br>cagaarshow nooca B | **Varicella***<br>(bus-bus) wuxuu bilaabanayaa |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **Dugsiga ka hor** | ✓✓✓✓ | ✓✓✓ | ✓ | ugu yaraan ✓ | | ✓ |
| **Gaaro da'da lagu bilaabo dugsiga** | ✓✓✓✓✓<br>tallaalka 5aad looma baahno hadii kii 4aad uu qaatay markuu 4 jirsaday ka dib | ✓✓✓✓<br>tallaalka 4aad ee dabaysha looma baahna hadii kii 3aad uu qaatay markuu 4 jirsaday ka dib | ✓✓ | | ✓✓✓ | ✓ |
| **7 jir ilaa fasalka 6aad** | Uga yaraan ✓✓✓ | Ugu yaraan ✓✓✓ | ✓ | | | |
| **Fasalka 7aad ilaa fasalka 12aad** | Ugu yaraan ✓✓✓<br>IYO hal tallaal oo Td ah ayaa laga rabaa 11 jirka iyo wiixii ka weyn** | Ugu yaraan ✓✓✓ | ✓✓ | | ✓✓✓<br>fasalka 7aad oo keliya*** | ✓<br>fasalka 7aad oo keliya |

* Haddii ilmaha uu mar hore bus-bus ku dhacday looma baahna in laga tallaalo immika.

** Haddii Td (teetano & Diphteria) aan ilmaha laga tallaalin markay 7 jirsadeen ka dib; waa in la tallaalaa 10 sanno ka dib markii lallaalkii ugu dambeeyey la siiyey.

*** Ilmaha da'doodu u dhexeyso 11 ilaa 15 waxaa loo ballamin karaa laba tallaal oo cagaarshowga noociisa B ah haddii loo baahdo in sidaa la yeelo.

**Si dugsi looga dhigto Minnesota, ilmuhu waa in ay keenaan dugsiga caddeyn tusinaysa in ay qaateen dhammaan tallaalada looga baahan yahay ama ay ka buuxiyaan dugsiga foomka ka kaaftoonka ee sharciga ah.**

Waalidku waxay buuxin karaan foomka ka kaaftoonka oo ay ka soo saxiixayaan adeegaha rugta xanaanada ilmaha ama diidmo uu ku saxiixan yahay waalidka/qofka ilmaha ka mas'uulka ah oo nootaayo la soo mariyey.

Waxaa lagu talinayaa in ilmaha ka yar 5ta sanno laga tallaalo nimooniyada laakiin taasi khasab maahan loogamana baahna dugsiyada.

Ilmahoo dhan waa in laga tallaalaa cagaarshowga nooca B – ma ahan in sharci ahaan dugsiyada uun looga baahan yahay oo keliya.

Wixii akhbaar dheeri ah fadlan wac dhakhtarkaaga, rugtaada caafimaad, ama xafiiska bixiya qorshahaaga caafimaadka.

Hay'adda Caafimaadka ee Minnesota, Barnaamijka Tallaalada
www.health.state.mn.us/immunize

Are your kids ready for school – Somali IC# 141-0779 (MDH, 3/2005)